

**Dulmarka guud ee loogu talagalay
ganacsiga yar yar**

Ganacsigaaga iyo canshuurta

Tusahan wuxuu kaa caawinayaa inaad fahanto waajibaadka canshuurta ee ganacsigaaga iyo waxaad xaq u leedahay. Waxaa laga yaabaa in tani kaa caawiso inaad lacag dhaqaalayso.



Australian Government
Australian Taxation Office

BALLANQAADKA AAN KUU HAYNO

Waxaan kuu ballan-qaadaynaa inaan ku siino macluumaad sax ah, wadajira oo qeexan si laguugu caawiyo inaad fahamto xuquuqdaada iyo xaqaaga si aad u fuliso waajibaadkaaga. Haddii aad dareensan tahay in faafiskan uusan si fiican u daboolayn duruufahaaga, ama aadan hubin sida ay kuu khusayso, waxaad naga codsan kartaa caawimaad dheeraad ah.

Si joogto ah ayaan dib-u-eegid ugu samaynaa faafisyadayada si aan u tixgelino wixii isbaddalo ah oo ku dhaca sharciga, sidaa darteed waa inaad hubisaa inaad haysato macluumaadkii ugu dambeeyey. Haddii aadan hubin, waxaad macluumaadkii ugu dambeeyey oo badan ka eegi kartaa website-kayaga ah **www.ato.gov.au** ama nala soo xiriir.

Faafiskan wuxuu jiraa **May 2011**.

© AUSTRALIAN TAXATION OFFICE FOR THE COMMONWEALTH OF AUSTRALIA, 2011

Waxaad xor u tahay inaad koobi-garayso, qaadato, wax-ka-badesho, gudbiso ama aad qaybiso waxyaalahan sidaad doontaba (hase ahaatee aan ahayn si sheegaysa in ATO ama Commonwealth inay u ogolaadeen adiga ama adeegyadaada ama badeecadaada).

WAXAA DAABACAY

Australian Taxation Office
Canberra
May 2011

NAT 72783SOM-05.2011 [JS 24621]

TUSAHA

DOORASHADA NOOCA GANACSIGAAGA	2
DIIWAANGELINTA GANACSIGAAGA	3
Lambarka faylka Canshuurta	3
Lambarka Ganacsiga Australia	3
FULINTA WAAJIBAADKAAGA CANSHUUREED	5
Xareynta caddaynta dhaqdhaqaaqa ganacsigaaga	5
FULINTA WAAJIBAADKAAGA CANSHUUREED HADDII AAD HEYSATO SHAQAALE	6
Superannuation-ka	7
Haddii shaqaalahaagu yahay qandaraaslayaal madax bannaan	8
WAXYAALHA LAGA GOYNAYO GANACSIGA KHARASH AHAAN	9
XAFIDIDA DIIWAANKA	10
WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH	12

DOORASHADA NOOCA GANACSIGAAGA

Waxaad u baahan doontaa inaad doorato nooca ganacsigaaga ee baahidaada ugu haboon. Waxaa jira afar nooc oo waaweyn ahna noocyada caamka ah ee ay isticmaalaan ganacsiga yar yar ee Australiya:

- Ganacsade kali ah (*sole trader*)
- Iskaashato (*partnership*)
- Ammaano (*trust*), iyo
- Shirkad (*company*).

Nooca shaqada ee aad doorato waa muhiim maadaama ay saameynayso waajibaadkaaga cashuureed.

La hadal la taliyaha cashuurta ama anaga haddii aad uga baahan tahay in lagaa caawiyo go'aankaaga. Faahfaahinta xiriirkeena waxay ku qoran tahay qaybta 'macluumaad dheeraad ah' ee buuggan yar dhammaadkiisa.

DIIWAANGELINTA GANACSIGAAGA

Si aad u bilowdo ganacsigaaga, waxaad u baahan doontaa lambarka faylka cashuurta (TFN). Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad sameysato lambarka ganacsiga Australiya (ABN) ee ganacsigaaga.

LAMBARKA FAYLKA CANSHUURTA

Lambarka faylka Canshuurta (*Tax File Number - TFN*) waa lambar aan ku siineyno adiga, shirkadaada, shirkada ama trust. Waxaad u baahan tahay TFN aqoonsi ahaan

TFN waa nooc aqoonsi oo muhiim ah Australiya saa daraadeed u xafid si ammaan ah, sidii aad yeeli lahayd baasaboorkaaga ama faahfaahinta xisaabta bangigaaga.

Haddii aadan heysan TFN, waxaa laga yaabaa inaad ku bixiso cashuurta heerka ugu sareeya, iyadoon loo eegaynin dakhligaagu intuu le'eg yahay.

Haddii aad ku jirto ganacsi, oo aad dooneysid inaad ogaatid wax badan oo ku saabsan TFNs iyo sidii aad u dalban lahayd, nagala soo xiriir **13 28 66**.

LAMBARKA GANACSIGA AUSTRALIA

Lambarka Ganacsiga Australia (*Australian Business Number - ABN*) waa lambarka aad u isticmaasho markaad la macaamileyso ganacsiyada kale, dawlada iyo ATO. Haddii aadan ku sheegin ABN kaaga qaansheeqadkaaga, ganacsiyada kale waxay kaa jarayaan boqolkiiba 46.5% wixii lacag ah ee ay ku siiyaan.

Iyadoo ku xiran nooca ganacsiga ee aad leedahay, waxaa laga yaabaa inaad isu diiwaangeliso cashuurahan soo socda:

Cashuurta adeegyada iyo alaabta

Cashuurta adeegyada iyo alaabta (*Goods and Services Tax - GST*) waa cashuur dhan 10% adeegyada iyo alaabta lagu iibiyo Australia gudaheeda. Waxaa qaada ganacsiyada diiwaanka gashan ee talaabo kasta oo ah taxanaha ganacsiga isku xiran (supply chain).

Waa inaad isu diiwaangelisaa GST haddii:

- aad ku jirto ganacsi, ama aad leedahay ganacsi oo ay dakhli sannadeedkaaga hadda ama ka qiyaasta ahi dhan yahay \$75,000 ama ka badan yahay
- aad wado tagasi, ama
- aad dooneysid inaad dalbato cashuurtaad ku bixisay shidaalka.

Haddii dakhli sannadeedkaagu ka hooseeyo \$75,000, waxaad weli dooran kartaa inaad isu diiwaangeliso GST. Mar haddii aad isdiiwaangeliso, waxaad dib u dalban kartaa GST –da aad bixiso marka ganacsigaagu iibsado adeegyada iyo alaabta.

Lacagtaad ka goyso dadkaad lacag siiso (Pay as you go withholding)

Sharciga cashuurta ee Australia waxaa hoos yimaada, waa inaad lacag ka reebto lacagahaad siiso dadka qaarkood ee aad dadka kale siiso, sida mushahaarka bilaha ah ama isbuuc laha ee aad siiso shaqaalaha. Tan waxaa loogu yeeraa Pay as you go (PAYG) withholding. Lacagtaad ka goyso waa inaad u dirto ATO.

Waxaad u baahan tahay inaad isu diiwaangeliso lacag ka goynta PAYG haddii aad siiso lacago:

- shaqaale, kuwa xafiiska ka shaqeeya iyo agaasimayaasha shirkada
- nidaamka shaqaalaha la soo kireysto
- heshiiska ikhtihaariga ah
- cidda wax kaa gada ee aan ku siin ABN, ama
- meeshii lagaa doonayo inaad lacago u dirto ATO xeerarka dakhliga adeegyada shakhsiyeed.

Canshuurta Manfacyada Dulsocodka ah (Fringe benefits tax)

Loo shaqeeye ahaan, waa inaad bixiso Canshuurta Manfacyada Dulsocodka ah (*Fringe Benefits Tax - FBT*) ATO haddii aad siiso faa'iido dheeraad ah shaqaalaha.

Canshuurta Manfacyada Dulsocodka ah ma aha lacag la siiyo shaqaalaha iyo/ama qoysaskooda. Waxaa ka mid ah:

- isticmaalka arimo gaar ah gaariga shaqada amase qalab kale oo shaqo
- dhar la xiran karo markaan shaqada lagu jirin
- ka bixinta ceymiska caafimaadka gaarka ah, ama
- deymaan raqiis ah, madadaalo ama alaab.

FULINTA WAAJIBAADKAAGA CANSHUUREED

XAREYNTA QORAALKAAGA WAXQABADKA GANACSIGAAGA

Guud ahaan, ganacsiyadu waxay isticmaalaan qoraal waxqabad si ay uga warbixiyaan una bixiyaan waajibaadkooda canshuureed oo ay ku jiraan GST iyo PAYG.

Haddii aad u diiwaangashan tahay GST, waxaad heli doontaa qoraalka waxqabadka ganacsiga (*Business Activity Statement - BAS*). Guud ahaan waa inaad xareysaa BAS –kaaga saddexdii biloodba mar.

Haddii aadan u diiwaangashaneyn GST, waa inaad buuxisaa qoraalka waxqabadka oo qayb qayb ah (*Instalment Activity Statement - IAS*) oo aad naga heli doonto midkood sannadka kuugu horeeya ama sannadka labaad ee ganacsiga.

Waa muhiim inaad buuxiso oo xareyso qoraalada waxqabadka oo aadna bixiso wakhtiga lagaa rabo wixii lacag ah lagugu leeyahay, ee lagugu tusayo qoraalka waxqabadka.

FULINTA WAAJIBAADKAAGA CANSHUUREED HADDII AAD HEYSATO SHAQAALE

Markaad shaqo bilowdo, waa inaad weydiisaa shaqaalahaaga inay buuxiyaan caddeynta lambarka faylka canshuurta (*Tax File Number (TFN) declaration*).

Markaad yeelato shaqaale, waa inaad ka jartaa canshuurta saxda ah mushahaarkooda oo aad u dirtaa ATO. Nidaamkan waxaa la yiraahdaa ka goynta waxaana lagu sameeyaa nidaamka lacag ka goynta ee bixi markaad qaadataba (PAYG).

Waa inaad ka diiwaangelisaa ganacsigaaga ATO ka hor intaadan lacag ka goyn lacagta shaqaalahaaga.

Caddadka lacagta ee aad ka goynayso shaqaalaha mushaarkooda wuxuu ku xiran yahay inta la siiyo iyo macluumaadka ay kugu siiyeen caddeynta TFN.

Guud ahaan, waxaad u sheegtaa oo aad bixisaa lacagtaad ka goysay ATO saddexdii biloodba mar markaad xareyso Qoraalka Waxqabadka Shaqo ee Ganacsiga (BAS).

Waxaa sidoo kale lagaa doonayaa inaad siiso shaqaale kasta gabagabada lacag bixinta sannadkii shaqaale kasta ee caddadka laga gooyey iyaga sannad xisaabeedkan intii lagu jiray. Waa inaad siisaa wadarta lacag sannadeedka aad siisey shaqaalahaaga laba toddobaad guddahood markuu dhammaado sannad xisaabeedku (1 Luulyo ilaa 30 Juun).

Waa inaad sidoo kale siisaa warbixin sannadeed ATO ee caddadka lacagtaad ka goysay shaqaalahaaga ka dib dhammaadka sannad xisaabeedka 30 Juun.

SUPERANNUATION-KA

Shuruucda Australia waxay uga baahan yihiin loo shaqeeyayaashu inay bixiyaan taageerada lacagta superannuation-ka shaqaalaha da'a doodu u dhaxeeyso 18 iyo 70 ee la siiyo \$450 ama wax ka badan bishiiba. Caddadka aad u baahan tahay inaad bixiso wuxuu u dhigmaa boqolkiiba 9% ee mushaarka aasaasiga ah ee shaqaalaha xaqa u leh, inkastoo aad bixin karto intaa ka badan haddii aad dooneyso.

Haddii aadan bixin lacag ku filan maalinta 28 ee ku xigta dhammaadka saddex bilood (eeg shaxda hoose), waa inaad xareysaa Superannuation guarantee charge statement (qoraalka dalacaada ballan qaadida lacagta hawl gabka), oo aad bixisaa dheeraad iyo wixii lagu saaro ATO. Tani waa doorasho aad qaali u ah sababtoo ah waxaa ku jira dulsaar iyo waxyaalo kale oo lagu saaray oo **aanan** canshuurta laga jareynin.

Taariikhaha lacagta hawl gabku waa:

Saddexda bilood ee la bixinayo Lacagta hawl gabka	Taariikhaha ugu danbeeya ee la bixinayo lacagta hawl gabka	Taariikhaha ugu danbeeya ee la xareynayo 'Superannuation Guarantee charge statement' iyo bixinta goor danbe lacagta hawl gabka
1 Luulyo – 30 Sibteembar	28 Oktoobar	28 Nofeembar
1 Oktoobar – 31 Diisembar	28 Janaayo	28 Febaraayo
1 Janaayo – 31 Maarso	28 Abriil	28 Maajo
1 Abriil – 30 Juun	28 Luulyo	28 Ogoosto

HADDII SHAQAALHAAGU YAHAY QANDARAASLAYAAL MADAX BANNAAN

Haddii aad shaqaaleyso qandaraaslayaal madax bannaan, waxaa laga yaabaa inay iyagu iskood u bixiyaan qayb qayb ahaan PAYG -kooda, ama waxaa laga yaabaa inaad la gasho heshiis ikhtiyaari ah oo aad lacag kaga goyneysid. Si aad u ogaato wax intaas ka badan oo ku saabsan kala duwanaanshaha u dhaxeeya shaqaalaha iyo qandaraaslayaasha madaxa bannaan, gal **www.ato.gov.au** oo raadi Employee Contractor Decision Tool (Qalabka Go'aanka Qandaraaslaha Shaqaalaha ah).

WAXYAALAHA LAGA GOYNAYO GANACSIGA KHARASH AHAAN

Haddii aad kharashgareyso lacag oo la xiriirta shaqadaada, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad u dalbato lacagtaan si ay kaaga yareyso canshuurta, taas oo micnaheedu yahay waxaad bixineysaa canshuur yar.

Waxaa jira laba xeer oo aasaasi ah. Ka koowaad, waa inaad dhab ahaan u bixisay ama go'aamisay inaad kharashgareyso lacagta iyo laba kharashku waa inuu la xiriiraa ganacsiga.

Lacag ka jarida laga yaabo inaad dalbato waxaa ka mid ah:

- ijaar ama kireysiga dhismaha ganacsiga
- qalab ama warshad inaad soo kireysato ama kireyso
- qalab
- kharashaadka shaqaalaha
- dulsaarka lacagta aad soo deymatay
- kharashaadka gaariga
- dayactirka
- kharashaadka taleefanka
- ujrada bangiga iyo kharashka
- gaadiidka iyo xamuul qaadista iyo
- korontada.

XIFIDIDA DIIWAANKA

Xafidid xumada diiwaanka waa mid ka mid ah siyaalaha ugu muhiimsan ee ay ganacsiyada yar yari u guul dareystaan.

Diiwaangelinta waxay kaa caawineysaa:

- ogaanshaha sida ganacsigu yahay
- tus sida wanaagsan ee ganacsigaagu u socda bangiyada, kuwa lacagta deymiya iyo kuwa laga yaabo inay iibsadaan, iyo
- inaad xisaabiyahaaga sida ugu fiican u isticmaasho.

Waa inaad heysaa diiwaanka ganacsiga ugu yaraan shan sanno. Diiwaanadan waxaa ka mid ah:

- qoraalka iibka caddeynaya, warqadaha xisaabiyaha, dockets credit card ka, buugta lacag dhigashada iyo qoraalada xisaabta bangiga
- diiwaanka wax soo gadashada caddeynaya, oo ay ku jiraan bixinta kharashaadka, cadeymaha lacag caddaan ah oo yar wax ku iibsiga, dabada jeega iyo buugga log-ga gaariga kharashaadkiisa lagu qoro
- diiwaanada GST sida qaansheegadka canshuurta, qoraalada yar yar ee wax lagu saxayo iyo wixii dukumiinti kale ah oo lagu diiwaangeliyo sida qiyaasaha ama xisaabinta GST.
- Diiwaanada bixinta mushaharka iyo bixinta lacagta hawl gabka, iyo
- Diiwaanada la xiriira diyaarinta :
 - canshuur celinta dakhligaaga
 - canshuur celinta FBT
 - BAS, iyo
 - bixinta ballan qaadka lacagta hawl gabka

Diiwaanadu waxay noqon karaan warqad ama elektaroonic (kumbiyuutar) waana inuu ahaadaa Ingiriis, ama qaab la heli karo oo si sahal ah loogu rogi karo Ingiriis.

Liiska diiwaanka oo buuxa ee ay tahay inaad xafido, tixraac 'record keeping evaluation tool' (qalabka qiimeynta diiwaan xafidida) ee website kayaga. Kani waa barnaamij bilaash ah oo ujeedadiisu tahay inuu kaa caawiyo inaad fahamto diiwaanada aad u baahan tahay inaad heyso iyo sidii aad u hagaajin lahayd xafidida diiwaankaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xafidaada diiwaanka ganacsiga, naga soo wac **13 28 66** ama arag la taliyahaaga aqoonta canshuuraha.

WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Haddii aad jeclaan lahayd inaad nalaga hadasho ATO wax ku saabsan waajibaadkaaga canshuurta, wac **13 28 66**. Waxaad sidoo kale soo wici kartaa lambarkan si mid ka mid ah saraakiishayada canshuurtu inay ku soo booqdaan si ay kaala hadlaan baahidaada shakhsi ahaaneed ee ganacsi. Faahfaahinta xiriirka kale ee muhiimka ah waxay ku taxan yihiin hoos.

WEBSITE-DADA

- Australian Taxation Office
www.ato.gov.au
- Adeegyada interneetka ee ATO, oo ay ku jiraan Business Portal (Portal Ganacsiga)
www.ato.gov.au/onlineservices
- Website ka macluumaadka Dawlada Australia
www.business.gov.au
- Tax Practitioners Board (si aad u jeegareyso inuu xirfadlaha canshuurtu diiwaangashan yahay) **www.tpb.gov.au**

LAMBARADA TALEEFANKA

- Business tax infoline (khadka taleefanka canshuurta ganacsiga) **13 28 66**
- Superannuation infoline (Khadka taleefanka lacagta hawl gabka) **13 10 20**
- Aboriginal and Torres Strait Islander infoline **13 10 30**
- Personal tax infoline (khadka taleefanka canshuurta shakhsiyeed) **13 28 61**
- Adeega Turjumaanka afka iyo Qoraalka (TIS) – haddii aadan ku hadlin Ingiriis oo aad caawimaad uga baahan tahay ATO **13 14 50**
- National Relay Service – haddii aad wax ka qabto hadalka ama maqalka oo aad isticmaasho taleefan modem ah ama TTY – wixii ah **1800** lambarada wicitaankoodu bilaashka yahay, taleefan u dir **1800 555 677** oo sheeg lambarkaad u baahan tahay **13 36 77**
- Speech to Speech Relay Service – haddii aad hadalka wax ka qabto oo aadan isticmaalin TTY ama modem – wixii ah **1800** lambarada wicitaanka bilaashka ah, taleefan **1800 555 727** sheeg lambarkaad u baahan tahay. **1300 555 727**
- Department of Immigration and Citizenship (Wasaaradda Socdaalka iyo Dhalashada) **13 18 81**
- Tax Practitioners Board **1300 362 829**
(Golaha Xirfadlayaasha Canshuurta)
La taliyahaaga canshuurta ayaa sidoo kale kaa caawinaya tallo ku saabsan sida ugu wanaagsan ee aad u fulinayso waajibaadkaaga canshuurta.

